Skolverket

Ku socota
Waalidka/waaliddiinta ardayda dhigata fasalka 3
ee dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga dadka Saamaha ah
ama fasalka 4 ee dugsiga gaarka ah

Imtixaan qaran

Waa la idin salaamay!

Waxaad warqaddan u heleysaa iyadoo ay sababtu tahay in aad waalid iyo/ama waaliddiin u tihiin arday xilli dugsiyeedka guga imtixaan qaran ku sameyn doona maddooyinka xisaabta, swiidhishka iyo swiidhishka luqad labaad ahaanta ah.

Maxay ardaydu u sameynayaan imtixaan qaran?

Ardayda dhigata fasalka 3 ee dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga dadka saamaha ah iyo fasalka 4 ee dugsiga gaarka ah waxay sameynayaan imtixaan qaran. Imtixaanku wuxuu gacan ka geysanayaa in si isu dhiganta oo caddaalad ah loo qiimeeyo ardayda aqoontooda. Imtixaanku wuxuu macallimiinta gacan ka siinayaa in ay ardayda aqoontooda u qiimeeyaan si waafaqsan shuruudaha aqoon ahaan leyska rabo ee ku jira manhajka waxbarashada ku yaalla.

Imtixaanka waxaa lagu hormariyaa, laguna diyaariyaa jaamacadaha Stockholm iyo Uppsala oo ay Hey'adda dugsiyadu u xil saartay. Macluumaadka imtixaanka ku jira waxaa lagu tijaabiyay dugsiyo fara badan oo kala duduwan oo waddanka oo dhan ku faafsan. Arday iyo macallimiin ayaa ka dhiibtay aragtiyo la tixgeliyay markii imtixaanka la soo saarayay.

Waa manhajyada waxbarashada ee maaddooyinka kala duduwan halka laga duulayo marka waxa uu imtixaanku ka koobnaanayo iyo qaabkiisa la go'aaminayo. Laakiin wax walba oo manhaj waxbarasho ku jira hal imtixaan laguma tijaabin karo. Imtixaan nuucaas ah wuxuu noqon karaa mid si xad ka bax ah u ballaaran.

Imtixaannada qaranku kama duulayaan qaab shaqo oo go'an ama qalab waxbarasho oo gooni ah. Imtixaanka wuxuu ardaygu siyaado kala duduwan ugu muujinayaa aqoontiisa.

Goormee imtixaannada la qaadayaa?

Imtixaannada qaran waxay ka koobanyihiin imtixaan-qeybeedyo kala duduwan. Imtixaannada waxaa la qaadayaa inta xilli dugsiyeedka guga lagu jiro, usbuucyada 11-20, waana waajib in la sameeyo. Dugsiga ayaa go'aan ka gaaraya goorta imtixaan-qeybeeyada kala duduwan la sameynayo. Fikirku waa in imtixaannadu ay qeyb wax dhigidda ka noqdaan ilaa iyo inta ay suurta gal tahay inta waqtiga lagu jiro.

Sidee loo qiimeynayaa imtixaannada?

Waxaa jira tilmaamooyin faahfaahsan oo qiimeynta imtixaannadaas qaran loogu tala galay oo uu macallinku raacayo. Marka uu dabadeed macallinku sameeyo qiimeyn guud oo

aqoonta ardayga ee maaddada ku aaddan wuxuu xitaa macallinku tixgelin siinayaa natiijada imtixaanka.

Natiijo ururin

Hey'adda dugsiyadu waxay si iskaashi la leh Hey'adda dhexe ee tira koobka ururineysaa natiijooyinka imtixaannadaas qaran. Ururinta natiijooyinka imtixaanka waa loo baahanyahay si qiimeyn dugsiyada loogu sameeyo laakiin xitaa si loo lafa guro natiijooyinka waddanka ee degmooyinka gudohooda iyo milkiilayaasha dugsiyada xurta ah.

Maxay imtixaannada maaddooyinku ka koobanyihiin?

Imtixaannada waddanku waxay leeyihiin mowduuc isku mid ah. Mowduucu wuxuu ka duulayaa sheeko ku aaddan carruurta Nova iyo Troj. Ula jeeddada sheekada laga leeyahay waa in aan xaaladda imtixaanka laga dhigin wax sidaas khatar u ah, ardaydana loo dhib yareeyo. Imtixaan-qeybeed kasta ka dib waxaa sawir iyo qoraal sheekada ka mid ah lagu dhejinayaa qolka fasalka. Marka qeyb walba booskeeda la dhigo wey dhammaanayaan sidoo kale wixii carruurta la marsiinayay, ardayduna wey dhammeeyeen qeybaha imtixaanka oo dhan.

Xisaab

Imtixaanka qaranka ee xisaabtu wuxuu ka koobanyahay qeybo kala duduwan oo imtixaan-qeybeedyo ah oo leh hawlo shaqo oo qoraal ah oo ardaydu si shakhsi ahaan ah u xallinayaan iyo hawlo shaqo oo afka ah oo ay ardaydu kooxo yar-yar ahaan ku xallinayaan. Hawlaha shaqada ee qoraalka ah iyo kuwa afka ah labadaba waxaa ardayda fursad loo siinayaa in ay muujiyaan in ay sharraxi karaan, ayna ka doodi karaan sidii ay xisaab ahaan u fikireen.

Swiidhishka iyo swiidhishka luqad labaad ahaanta ah

Imtixaanka qaranka ee maaddooyinka swiidhishka ah wey mideysanyihiin, waxayna ka koobanyihiin tiro imtixaan qeybeedyo ah. Waxaa jira hawlo shaqo oo ay ardaydu u xallinayaan si shakhsi ahaan ah iyo si koox ahaan ah intaba. Iyadoo hawlahaas shaqada la adeegsanayo ayey ardaydu fursad u helayaan in ay muujiyaan aqoontooda ku aaddan hadalka, wada hadalka, akhriska iyo qoridda.

Maxay yihiin astaanta aqoontu iyo is-qiimeyntu?

Natiijada ardayga ee imtixaanka qaranka iyo qiimeynta macallinka ee ku aaddan ardayga wax qabadkiiska kale ee maaddooyinka waxaa lagu soo koobi karaa astaanta aqoonta. Dukumiintiyadaas waxaa saldhig ahaan loo isticmaali karaa marka wada hadalka horuumarka la sameynayo.

Imtixaan kasta wuxuu leeyahay qeyb is-qiimeyn ah halkaas oo uu ardaygu ku fikiri karo waxbarashadiisa, kuna tilmaami karo kartidiisa ku aaddan maaddo kastaba goonideeda. Is-qiimeyn waxaa markaas ka dib la barbar dhigi karaa astaanta aqooneed ee maaddada, waana laga wada hadli karaa marka wadahalka horuumarka la yeelanayo.

Skolverket

Xaggee macluumaad dheeraad ah laga helaa?

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan imtixaannada qaran ee maddooyinka waxaa laga helaa barta intarneetka ee Hey'adda dugsiyada

www.skolverket.se/bedomning

www.skolverket.se/garanti-tidigt-stod

Halkaas waxaa sidoo kale laga helaa isku xirayaal tusaale ahaan ku aaddan hawlo shaqo oo imtixaannada ka mid ah.

Hey'adda dugsiyada kala xiriir

nationellaprov@skolverket.se